

# SafeArrival

## Student Absence Management System



Waterloo Catholic  
District School Board  
Quality, Inclusive, Faith Based Education



### Waa maxay SafeArrival?

SafeArrival waa nidaam cusub oo loogu talagalay maareynta maqnaanshiyaha ardayda. Qoysasku maqnaanshiyaha hore ayaa ay usoo sheegi karaan iyaga oo adeegsanaya app taleefanka gacanta ah, websayt, ama layn taleefan oo bilaash ah. Ikhtiyaaradan waxa la heli karaa 24 ka saacadood maalintii, 7 da maalmood ee toddobaadkii.

### Waa maxay sababta aanu u adeegsanayno SafeArrival?

- Waxa uu xoojiyaa ammaanka ardayga.
- Waxa uu ka caawiyaa qoysaska inay si fudud usoo sheegaan maqnaanshiyaha ardayda.
- Waxa uu ka caawiyaa dugsiyada inay si dhakhso ah jawaab uga bixiyaan maqnaanshiyaha ardayda ee aan la sharxin.
- Waxa uu dedejiyaa ogaysiisyada la siinayo qoysaska.

### Sidee loo adeegsadaa SafeArrival?

Waxaa jira saddex qaab oo aad kusoo sheegi karto maqnaanshiyaha ardayga:

*Muhiim: Waxa aad adeegsataa cinwaanka iimeylka ee dugsiya ardaygaagu kaa hayo marka aad akown ka sameysanayso app ka/websaytka.*

- 1) **App:** Ku soo dejiso app ka SchoolMessenger taleefankaaga gacanta ama waxa aad ka gashaa app ka WCDSB. Fur app ka kadibna dooro *Sign Up (Isdiiwaangali)* si aad isku diiwaangeliso. Kadib marka aad isdiiwaangeliso, waxa aad *Attendance (Xaadirista)* ka doorataa menu ga, kadibna kasii dooro *Report an Absence (Soo gudbi maqnaanshiyaha)* oo raac tilmaamaha.
- 2) **Websaytka:** Waxa aad booqataa [go.schoolmessenger.ca](http://go.schoolmessenger.ca). Waxa aad doorataa *Sign Up* si aad u samaysato akownkaaga. Marka aad isdiiwaangeliso, waxa aad *Attendance* ka doorataa menu ga, kadibna kasii dooro *Report an Absence* oo raac tilmaamaha.
- 3) **Taleefanka Bilaashka ah:** Waxa aad wacdaa taleefanka bilaashka ah ee 1-833-251-3283 si aad usoo sheegto maqnaanshiyaha adiga oo adeegsanaya nidaam taleefan oo otomaatig ah kadibna raac tilmaamaha.

### Macluumaad Faa'iido Leh:

- Haddii ardaygu uu habsaamayo, waxa aad doorataa Full Day kadibna kasii dooro Late. Dhammaan ardayda habsaamaysa waxa lagu calaamadiyaa maqnaanshiyaha maalinta oo dhan ah illaa ay yimaaddaan oo ay saxeexaan iyaga oo soo maraya xafiiska dugsiya.
- Maqnaanshiyaha isku maalin ee dugsiyada hoose waxa la soo sheegi karaa marka 20 daqiiqo kasoo wareegto wakhtiga bilawga dugsiya. Wakhtigaas kadib fadlan si toos ah u wac dugsiya.
- Maqnaanshiyaha isla-maalinta ah ee dugsiyada sare waxa lasoo sheegi karaa marka la gaadho 11:00 galabnimo.
- Sheegitaanka maqnaanshiyaha waa lasii qaddimi karaa maalin dugsiyeed kasta oo ku jirta kaalendarka dugsiya.
- Haddii ardayga lagu calaamadiyo maqnaanshiyaha isla markaana maqnaanshiyaha aan hore loo sii sheegin, nidaamkayaga SchoolMessenger waxa uu isku deyi doonaa in uu kula soo xidhiidho marar badan illaa aad xaqiijiso isla markaana aad sharraxdo maqnaanshiyaha. Haddii cid cayiman la heli waayo, shaqaalaha dugsiya ayaa dabagal ku sameyn doona. Si aad ogaysiisyadan uga hortagto, fadlan soo qaddin sheegitaanka maqnaanshiyaha ilmahaaga.

Learn more:

[wcdsb.ca/Parents/SchoolMessenger-SafeArrival](http://wcdsb.ca/Parents/SchoolMessenger-SafeArrival)

